

Wax walba sidii caadiga ahayd ma'ahan, oo waxaan fahamsanahay inay caqabad kugu tahay siyaabo badan oo kala duwan sida todobaadyadii ugu dambeeyay. Wuxaa ka qeyb qaadatay barashada fogaanta guriga.

Warbixinadii aan ka helnay macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. Wuxaan fahamsanahay inaad hawl fiican qabateen. Wuxaa ka qeyb qaadateen casharadii ku baxayey maqal iyo muuqaal.

Waanu qadarinaynaa dadaalka aad samaysay waqtigaan aan ku jirno xaalada adag! Cudurkaan ma'ahan mid dhammaadey sidaa darteed waxaa loo baahan yahay in aad dadaal dheeri muujinaa oo dhammaanteena nafta u hurnaa.

Taas waxaa loola jeedaa baajinta xafladaha, joojinta booqashooyinka, jimicsiga, joojinta booqashada shineemooyinka, kala fogaanshaha, booqashooyinka xarumaha dukaamaysiga, iskana ilaali inaad la kulanto dadka ka baxsan qoysk, sida ugu macquulsan.

Dabcan waa murugo iyo caajis, laakiin gabi ahaanba waa lagama maarmaan in la qaato masuuliyada lana eego bulshada wanaaggeeda. Isla mar ahaantaana, waxay qadarinaynaa Alléskolan waxay qaadeysaa mas'uuliyada ilaalinta arimaha ku saabsan waxbarashadaada iyo mustaqbalkaaga. Wadajir waxaan u baahanahay inaan masuuliyadaas iska saarno inaanan wax ku darsan, faafitaanka.

Cudurka oo yaraada iyo cadaadiska saaran gaadiidka dadweynaha isla waqtiga aan ka taxaddarno. Wuxaan kale oo hubineysaa inaad heshay waxbarashadaada.

Toddobaadkii la soo dhaafey, wasiiradeena waxbarashada Anna Ekström waxay si cad u sheegtey iney muhiim tahay. In skuulku qaadayo mas'uuliyad ah inaan kala fogaan karno midba midka kale. Iskuulka Alléskolan waxaan joognaa maalin walba, macallimiin badan iyo arday goobta jooga, si loo kala fogaada waxa ay noqoneysaa in la kala fogaado oo aan la isku soo dhowaan.

Taasi waa sababta guddiga sare ay u leeyihii oo ay weheliyaan kooxda maamulka iskuulka ayaa go'aansaday mudada 25 noofambar ilaa 18 diiseembar, Alléskolan waxay isku dari doontaa waxbarashada deegaanka iyo tan fogaanta. Qaar idinka mid ah waxa ay ku dhigan doonaan waxbarashada masaaafada halka kuwa kalena ay ku dhigan doonaan Alleskolan taas micnaheedu yahay in maalmaha u kala qeybin doono.

Nolosha guud iyo iskuulka labadaba, waxaa muhiim ah inaan dhamaanteen masuuliyad iska saarno raacida talooyinka khuseeya caafimaadka:

Joog guriga haddii aad leedahay astaamo

Kala fogaanshaha illali

Dhaq gacmahaaga badanaa

Inta lagu jiro muddada 25 Nofeembar ilaa 18 Diseembar, waxaa lagugu soo dhaweynayaan Alléskolan oo keliya maalmaha iyo xilliyada aad leedahay waxbarashada deegaanka. Waqtiga intiisa kale oo dhan, waxaan kaa filaynaa inaad gurigaaga joogto oo aad wax ku barato.

Markaad joogto Alléskolan oo aad leedahay waxbarasho deegaanka ah, waxaan fileynaa in:

Waa in aad taxadir muujisaa markaad dugsiga aadayso iyo markaad ka soo noqonayso
Markaad dugsiga joogto KA TAXADIR ardaydaada fasalka iyo macallimiinta ah.

Taaas macnaheedu waxa weeye inaad fadhiisato masaafo ka fog casharrada, nasashoooyinka iyo qadada, IN AADAN gacmaha isqabsan oo AANAD hab isisiinin, IN AAADAN isla fadhiisan hal shaashad ama Kunbiyutar isku mid ah iyo IN AADAN isku cariirin armaanjoodhinka alaabta la gashto.

Markaas adigoo dhoowraya masaafada kala fogaanshaha, waxaan isu muujineynaa daryeel midba midka kale!

Haddii adiga arday ahaan aad qabtid su'aalo ama fikir, la xiriir hagahaaga ama maamulahaaga!

Si wada jir ah ayaan uga gudbi doonaa cudurkan faafa anagoo ilaalinayna waxbarashadaada!

Kooxda maamulka